



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Soo Bandhigista Shabakada Agabyada Qoysaska PPS ee Ku Hadla Luqadaha Kala Duwan

Abril 15, 2021

Bulshada PPS ee Qaaliga ah,

Iyada oo aan wadno sidii aan ugu soo dhaweyn lahayn ardaydeena waxbarashada iskudhafan ee fasalada iskuulada lagu qaadanayo, maanta waxaan idinla wadaageynaa agabyo cusub oo aan idiin diyaarinay.

Mashruucani, waxaanu **Dib u Macneynay Waayo-aragnimada Dijitalka**, waxayna tahay khibrad si dhib yar aad u maareyn kartaan, luqadaha kala gedisan, iyada oo qofka addeegsanaya uu si dhib yar u isticmaali kara iyo iyada oo DHAMMAANA lagu soo dhaweynayo.

Waxaanu dhiseynaa Dugsiyada Dadweynaha Portland oo intii hore ka xoog badan isla markaana aad laguugu soo dhaweynayo. [Shabakada Agabyada PPS](#) ee luqadaha kala gedisan waxaad ka heli doontaan, isla mar ahaantaana aad ka baran doontaa agabyo laguugu diyaariyey waqtigani xaadirka ah haddii ay noqon lahayd gudaha ama dibada kuwaasi oo iskuul kasta uu kaaga taageerayo khibradaada PPS.

Qoysaska ardayda PPS iyo shaqaaluhuba waxay ka raadin karaan macluumaadka qeybahani hoos ku qoran:

- Taageerada waxbarashada,
- Lahaanshaha iyo ku xidhnaanshaha addeegyada ardayda,
- family supports and resources, and
- taageerada dhaqano gaar ah – kuwaasi oo la sii dhexmariyey dhammaan qeybaha kale oo dhan

Waxaan rajeyneynaa in shabakadani ay tahay mid ay shaqadeedu socoto iyo sidoo kalena waxyaabaha laga helayaa ay yihii kuwa isbedelayo. Tani sidoo kale waxay na siineysaa fursad aan kor idiinku qaadaneyno sidii aan idiinku shabakada u horumarin lahayn.

Mahadsanid.